Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah

الجريدة الرسمية

Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 OCTOBER 2023** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## APRIL - OCTOBER

# 2023

**SHARCI LR. 14** **TAARIIKH: 10 $^{KA}$ SEBTEEMBAR 2023**

**SHARCIGA XAFIISKA HANTI-DHOWRKA GUUD ee J.F.S**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87$^{aad}$, Faqradda 1$^{aad}$ iyo Faqradda 2$^{aad}$ ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90$^{aad}$, Xarafka "f" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka **XGGGSH/0381/B11/23**, ku taariikhaysan **07/09/2023**, ujeedaduna tahay soo gudbin hindise sharciyeedka Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee J.F.S.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1$^{aad}$**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ku dhaqanka Sharciga Xafiiska Hanti-Dhowrka Guud ee J.F.S.

**Qodobka 2$^{aad}$**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/109/2023
TAARIIKH: 29/10/2023
SAXIIX:
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

**Madaxweynaha J. F.S**
**Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE SHARCIYEEDKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
17 AUG 2023
SOO GELID/RECEIVED

## CUTUBKA KOOWAAD:
## HORDHAC
### Qodobka 1aad:
### Magaca Sharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Xafiiska Hantidhawrka Guudee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, si waafaqsan Dastuurka.

### Qodobka 2aad:
### Ujeeddada Sharciga

Ujeeddada Sharcigan waa in:

1) Lagu maamulo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, kaas oo ah hay'ad dowladeed o o madax-bannaan, sida ku cad Sharcigan iyo Dastuurka JFS.
2) Uu nidaamiyo gudashada waajibka hantidhawris ee saaran Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS iyo xuquuqda helitaanka xogta Xafiisku u baahan yahay.
3) Uu Xafiiska Hantidhawrku warbixin ka siiyo sannadkiiba mar ama natiijada kasoo baxda baaritaannada uu sameeyo Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha Xakuumadda FS.
4) Uu qeexo habka lagu magacaabayo ama xilka looga qaadayo Hantidhawraha Guud ee JFS.

### Qodobka 3aad:
### Eray-bixin

Erayada hoos ku qoran, haddii aan si kale loogu sheegin macnahooda sharcigan dhexdiisa, waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

1) "Wakaalad Dowladeed": waxaa loola jeedaa hay'ad kasta oo madax-banaan, Shirkad, Xafiis, Guddi, Gole, Hay'ad ama Mac-had, Maamul ama urur ay leedahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2) "Wasiir ku haboon": waxaa loola jeedaa marka loo fiiriyo xiriirka ka dhexeeya Hay'ad Dowladeed, wasiirka leh awood maamul oo lagu xusay sharciga la xiriira sharciyadda Hay'addaas.
3) "Sharciga Qoondaynta": waxaa loola jeedaa xeer miisaaniyad sannadeed lacag lagu qoondeeyo oo ku saabsan qabashada iyo isticmaalka maaliyad-sannadeedka xukuumadda ee uu Baarlamaanku ansixiyo, looguna talo galay adeegyada guud ee Dowladda ama mid gaar ah, sida lagu sheegay Sharcigaas.
4) "Xeerka Anshaxa": waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye dhammeystiran oo tilmaamaya anshaxa iyo mabaadi'da hagaysa shaqada dhammaan dadka ka shaqeeya ama u shaqeeya Hay'adaha Dowladda.
5) "Dastuur": waxaa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
6) "Dukumenti": waxaa loola jeedaa xog keydin kasta oo qoraal ah, cod, sawir ama wax kasta oo lagu sameeyo calaamado, jaantusyo, astaamo ama guntimo, kuwaas oo macno u leh dadka aqoonta u leh in ay fasiraan iyo wax kasta oo suuro-gal ah in gudihiisa laga soo saaro ama laga min-guuriyo codad, sawiro ama qoraal, iyadoo qalab farsamo oo kale lala kaashanayo ama aan wax kale lala kaashanayn.
7) "Kharash": waxaa loola jeedaa bixinta lacagaha qoondada ku tala-galka ee Hay'adaha dowladda ee sanadlaha ah ee uu oggolaaday Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
8) "Amar Kharash-bixin": waxaa loola jeedaa amar lacag bixineed oo ay soo saartay Hay'ad Dowladeed oo awood sharci u leh isticmaalka iyo bixinta kharashkaas.

9) "Miisaaniyadda Federaalka": waxaa loola jeedaa Miisaaniyad Sannadeedka ku tala-galka ee Xukuumadda JFS horgaysay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si uu u meelmariyo.

10) "Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS": waxaa loola jeedaa Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, sida ku xusan Dastuurka JFS.

11) "Hantidhawraha Guud": waxaa loola jeedaa Hantidhawraha Guud ee JFS oo ah Sarkaal Idman ee Xafiiska Hantidhawrka.

12) "Xukuumadda JFS": waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee xilka haysa ee Golaha Shacabku ansixiyay, sida uu tilmaamay Dastuurka JFS.

13) "Sharciyada Federaalka": waxaa loola jeedaa sharciyada uu meel-mariyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee Heer federaal ah.

14) "Hantidhawr": waxaa loola jeedaa, baaris uu fuliyo Xafiiska Hantidhawrku, si uu u hubiyo in hantida iyo qoraallada maaliyadeed ee hay'ad dowladeed uu waafaqsan yahay shuruudaha maaliyadda, loona isticmaalay kharashyada sidii loogu tala-galay ee sharciga qoondadu farayey.

15) "Madaxa Hay' ad Dowladeed": waxaa loola jeedaa qof kasta oo loo xilsaaray in uu qabto waajibka maamulidda iyo xisaabinta lacagaha ama wax-qabad kale, kuwaas oo loogu talagalay in lagu bixiyo lacago loo qoondeeyey si waafaqsan sharciga

16) "Wasaarad": waxaa loola jeedaa Wasaaradda mas'uulka ka ah Maaliyadda ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

17) "Wasiir": waxaa loola jeedaa wasiirka mas'uulka ka ah Wasaaradda Maaliyadda JFS.

18) "Sarkaal": waxaa loola jeedaa qof kasta oo u shaqeeya hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

19) "Baarlamaan": waxaa loola jeedaa labada gole ee la isku yiraahdo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sida ku cad Dastuurka Dalka.

20) "Guddiga Maaliyadda": waxaa loola jeedaa Guddiyada Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee u xilsaaran arrimaha Maaliyadda.

21) "Ku Tala-gal Qoondo la Dhowray": waxaa loola jeedaa ku-talo-galka qoondo aan la dhimi karin wax kasta oo dhaca, inta lagu gudo-jiro Miisaaniyad sanadeedka.

22) "Xisaabaadka Dowladda": waxaa loola jeedaa xisaabaadka ay ka mid yihiin; Xisaabaadka dhammaan Hay'adaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xisaabaadka dhammaan Hay'adaha ay Dowladdu ku leedahay saamiga ugu badan, lacagaha kale ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dhammaan Mashaariicda iyo barnaamijyada lagu maal-geliyey qaab deyn ama deeq ah oo ka yimid mid ka mid ah Dowladaha shisheeye ama Hay'adaha/Ururrada Caalamiga ah.

23) "Hay'ad Dowladeed": waxaa loola jeeda hay'ad kasta ee ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo maamul ahaan iyo miisaaniyad ahaan u hoos timaadda xayndaabka sharci ee JFS.

24) "Maamulka Maaliyadda Dowladda": Waxaa loola jeedaa u maamulidda dhaqaalaha si waafaqsan sharciga, nidaamka maaliyadda iyo u adeegsiga hababka xaqiijinaya beekhaaminta lacagta iyo isticmaalka wax-soo-saarka hantida Dowladda, si waafaqsan halbeegyada horey loo xaddiday iyo Misaaniyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

25) "Maaliyadda/Lacagta Dowladda": waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha ku jira khasnadda dhexe ee Dowladda ama ay maamusho hay'ad Dowladeed ama shaqsi matala iyo lacag ay maamusho hay'ad gaar loo leeyahay, iyadoo oggolaansho ka haysata hay'ad dowladeed oo awood u leh.

26) "Dakhli": waxaa loola jeedaa dhammaan waxa ka soo xarooda canshuuraha, celisyada, qiimaha, waajibaadka, biilasha, ganaaxyada, ciqaabaha, mag-dhaw, kirooyinka waajibay in la bixiyo, faa'iidooyinka iibka iyo dhammaan waxyaabaha kale ee Dowladdu dakhli u

hesho (meel uu ka soo galaba), kuwaas oo Xafiiska Hantidhawrku ku leeyahay awood uu ku sameeyn karo baaris in lagu dhaqmay ama la dhowray shuruucda nidaamiya.

27) "Hay'ad kharash bixisa ama adeeg": waxaa loola jeedaa hay'adaha Dowladda, Shirkadaha ama Wakaaladaha bixiya badeecadda iyo adeegga dadweynaha oo hoos timaadda wasaarad xiriir la leh si toos ah ama dadban, Ra'iisul Wasaaraha, isticmaalana kharashaadka ku jira Miisaaniyadda Federaalka ee la ansixiyay.

28) "Shirkad Dowladeed": waxaa loola jeedaa shirkad dhisan oo ay gacanta ku hayso Hay'ad Dowladeed, taas oo si buuxda ay u maamusho ama maal-gelin ay ku sameyso dakhligeeda hay'addu.

29) "Khasnadda-Mideysan (Treasury Single Account)": waxaa loola jeedaa nidaam isku dhafan ee xisaabo bangi oo awooda in lacagta caddaanka ah ee dawladda loo maareeyo qaab mideysan.

30) "JFS": Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaaliya

31) "F16": Waxaa loola jeedaa Warqada Kharash Bixinta (Expenditure Warrant)

## CUTUBKA LABAAD:
## XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD EE JFS
### Qodobka 4aad:
### Dib-u-habeynta Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu noqonayaa heer Federaal sida ku xusan Dasturka JFS, waxa uuna ka hawl-galayaa dhammaan dhulka Jamhuariyadda Federaalka Soomaaliya.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud waa hay'ad Madax-bannaan, waana hay'adda ugu sarreysa ee Baarista Hantida Dowladda Federaalka, waxa uuna warbixintiisa si kala madax-bannaan ugu gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha Xakuumadda JFS.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu fulinayaa mabaadi'da maamul wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta, isla-xisaabtanka ku saleysan ka hortagga lunsiga hanti dowladeed.
4) Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu noqonayaa Madaxa ugu sarreeya Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.

## CUTUBKA SEDDEXAAD:
## HANTIDHAWRISTA, WARBIXINTA IYO LASOCODKA
### Qodobka 5aad:
### Waajibaadka iyo Mas' uuliyadaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu leeyahay mas'uuliyadaha soo socda:

1) In uu sameeyo Hantidhawris madax-bannaan si loo ilaaliyo Hantida Dowladda Federaalka iyo in uu bixiyo talooyin lagu xoojinayo isla xisaabtanka, daah-furnaanta iyo hufnaanta nidaamka maamulka maaliyadda ee Dowladda.
2) In uu fuliyo hawlaha hantidhawrka, warbixinna ka siiyo, sida hawlahaas u socdaan Baarlaraanka, Madaxweynaha JFS iyo hadii loo baahdo in uu siiyo Hay'adaha talooyin ku saabsan dhawrista iyo ku dhaqanka sharciga.
3) In uu ilaaliyo dhawrista iyo ku dhaqanka sharciga maamulka maaliyadda iyo miisaaniyadda Dowladda, isaga oo wada-shaqeyn kala yeelanaya dhinacyada arrimahaas khuseeyaan, si kor loogu qaado, loona xoojiyo xirfadda hantidhawrista iyo maamulka maaliyadda.
4) In uu kaalmo xirfadeed iyo talo-bixin siiyo Xafiisyada Hantidhawrka ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo hay'adaha kale ee ku shaqada leh ilaalinta hantida iyo xirfadaha hantidhawrka.

5) In uu ku sameeyo hay'adaha dowladda baaris maaliyadeed (financial audit), qiimeynta ku dhaqankooda nidaamka Xisaabaadka iyo hab-raacyada loogu tala-galay, wax-qabadka iyo baarista kale ee la xariirta dhammaan xisaabaadka Guud ee Dowladda, lacagaha, hay'adaha Dowladda, Mashaariicda, barnaamijta, Shirkadaha Dowladdu leedahay ama ay qeyb ku leedahay iyo dhammaan hay'adaha la midka ah ee Dowladda.
6) Waxa uu baarayaa dhammaan xisaabaadka iyo akoonnada Dowladda, Maaliyadda, Mashaariicda, barnaamijyada iyo dhammaan hay'adaha Dowladda, Shirkadaha ay Dowladdu leedahay iyo hay'adaha la midka ah.
7) Waxa uu u gudbinayaa Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud warbixinta hay'adaha, haddii ay baaristiisa ka soo baxaan tuhun fal-dembiyeed, si Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud u sameeyo baaritanno hor leh, loona oogo dacwad ku wajahan cidda la tuhunsan yahay, sidoo kale in uu baaro been-abuurka, wax is- daba-marinta iyo khiyaano kasta oo lagu sameeyo maamulka maaliyadda dowladda, haddii ay ka soo baxaan inta lagu guda jiro howlaha baarista wax muujinayo in ay jiraan tuhun fal-dembiyeed, waxaa loo gudbinayaa hay'adaha ku shaqada leh.
8) Wuxuu daba-gal ku sameynayaa natiijooyinka ka soo baxa baaritaannada iyo talooyinka uu Xafiiska Hantidhawrka Guud hore u bixiyay, si loo hubiyo in la raacay isla markaana la saxay khalaadaadkii hore loo tilmaamay.
9) Waxa uu diiwaan-gelinayaa dhammaan qandaraasyada, heshiisyada, Shuruucda, xeerarka, deeqaha, deymaha, damaanadaha, kala wareejinta miisaaniyadda iyo dikreetooyinka Ra'iisul Wasaaraha iyo Madaxweynaha JFS.
10) Wuxuu sameeyaa diiwaan-gelinta awood siinta kharash bixinta (F16) kolka kharashku baxo kadib, si uu dib ugu sameeyo baaritaan. Diiwaan-gelinta awood siinta kharash bixinta (F16) looma adeegsan karo qaab ansixin ah.
11) Waxa uu sameynayaa oo kale hawl kasta oo suuro gelinaysa in laga guul gaaro waajibka xisaab xirka, sida ku cad Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee JFS.
12) Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu inta lagu gudo jiro hawlaha hantidhawrista xaqiijinayaa:
    b) In diiwaannada xisaabinta si sharciga waafaqsan loo adeegsado, loona hayo ama loo keydiyo.
    t) In xeerarka, hab-raacyada iyo kormeerada gudaha ee la adeegsado ay yihiin kuwo ku filan, si loo helo ilaalin wax-ku-ool ah oo ku saabsan qiimeynta, uruurinta iyo qoondeynta dakhliga Dowladda.
    j) In dhammaan lacagta la kharash gareeyey iyo midda la dhigay khasnadda dhexe sidii loogu tala-galay loo isticmaalay, sababtii ama sababihii lagu tilmaamay miisaaniyadda ku tala-galka Dowladda, sida ku cad xeer-miisaaniyeedka ay Labada Gole ee BFS ansixiyeen, iyadoo waliba la tixgelinayo xaqiijinta habka kormeerka iyo hantidhawrista gudaha ee Hay'adaha Dowladda.
    x) In kormeerrada gudaha, xeerarka iyo hab-raacyada la sameeyey ee la raacay ay yihiin kuwo ku filan xaqiijinta kormeerka xarumaha, keydinta alaabta ama bakhaarada iyo qeybaha kale ee hantida Dowladdu taalo.
13) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu hubinayaa in hantida Qaranka loo kharash gareeyey si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.
14) Xafiiska Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu baaris ku samaynayaa dhamaan Nidaamyada Macluumaadka Teknoolojiyada (ICT Audit) ee dowladu adeegsato, iyada oo loo fulinayo si waafaqsan Heerarka Tiknoolajiyada Macluumaadka caalamiga ah ee Soomaaliya aqoonsan tahay.
15) Xafiiska Hantidhawrka ee JFS waxa uu baarayaa dhammaan hay'adaha iyo shirkadaha ay Dowladdu leedahay ama qeybta ku leedahay, waxa uuna warbixintiisa u gudbinayaa Labada Gole Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS iyo Hay'adda ay khuseyso baarista.

16) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu qandaraas hoose la geli karaa hantidhawreyaal madax-bannaan, la-taliyeyaal iyo khabiiro aqoon u leh hawsha la baarayo, iyadoo la tixraacayo Sharciyada JFS, lana tixgalinayo Miisaaniyadda Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.
17) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu sameynayaa baaritaannada wax-qabadka (performance audit), waxa uuna baarayaa illaa iyo inta/heerka ay hay'adaha Dowladdu u adeegsadaan dhaqaalaha iyo kheyraadka si sax ah iyo in ay hawlaha u fuliyaan sidii loogu tala-galay, iyada oo la tixraacay Miisaaniyadda Dowladda iyo Sharciyadda JFS.
18) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu xaqiijinayaa in lacagaha Federaalka ee la siiyey Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, loo isticmaalay sidii loogu tala-galay oo ay ku jiraan deeqaha iyo deymaha caalamiga ah ee Dowladda FS ay si rasmi ah u saxiixday, si loo hubiyo in lacagahaasi ku baxeen sidii ku tala-galku ahaa, waxa uuna warbixintiisa u gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FS iyo dowlad-goboleedka ay khuseyso baarista.
19) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu u fuliyaa hawlaha hantidhawrista si waafaqsan halbeegyada Hantidhawrista caalamiga ah ee la aqoonsan yahay oo ay oggoshahay ku dhaqankooda JFS.
20) Inta ay ku jiraan hawlaha baarista, dhammaan shaqaalaha ka hawlgala Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa ay ilaalinayaan xeerka anshaxa ee Xafiiska iyo xeerarka caalamiga ah ee ay oggoshahay ku dhaqankooda JFS.
21) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS marka uu ka warbixinayo xog kasta oo qarsoodi, sir ama gaar ah waxa uu:
    b) Dhowrayaa sharciyada ilaaliya xogta gaarka u ah baarista ay ku sameeyeen qofka, hay'adda, shirkadda, Dowladda Federaalkaba iyo Dowladaha xubnaha ka ah DFS, iyadoo la tixgelinayo nooca gaarka ah ee xogta uu bixinayo;
    t) Bixinayaa talo ku saabsan natiijada baaristiisa oo uu siinayo Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS iyo madaxa mas'uulka ka ah hay'adda ay xogtu khuseyso, waxaana warbixinta hantidhawr ee xogtaas lagu xaddidayaa inta looga maarmi waayo bixinteeda.
22) Faqradda 21aad ee Qodobkan kama reebayso Xafiiska Hantidhawrka Guud in uu caddeeyo ama muujiyo natiijada ka soo baxda baarista lagu sameeyay isticmaalka kharash aan la fasixin ama si khalad ah ku baxa ama loo isticmaalay ama uu ka dhashay ficil khalad ah ama dembi ah ee la xariira arrimaha sharciga maareynta maaliyadda guud oo ay ku kacday hay'adda mas'uulka ka ah, iyadoo aan la faafinayn caddeynta, xaqiiqooyinka wax u dhimaya ama dhaawacaya danta guud ee JFS.
23) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu samaynayaa hawlo baaris hantidhawr oo ku salaysan hab-raacyada shuruucda dalka, nidaamyada iyo halbeegyada Hantidhawrka ee la aqoonsan yahay caalami ahaan, marka ay ka codsadaan sidaas Labada Gole ee Baarlamaanka JFS ama midkood, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda JFS iyo Hay'adaha kale ee dowladda.
24) Xafiiska Hantidhawrka JFS wuxuu samaynayaa baaris fatash ah (forensic audit) oo la xiriirta hawlaha wax-is-dabo marinta, khiyaanada, ku takrifalka awoodeed iyo si xun ama khaldan u adeegsiga hantida dowladda.
25) Inta uu ku guda jiro xil-gudashadiisa, Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu joojin karaa dhaq-dhaqaaqa xisaabta socota ee Hay'adda uu baarayo, sidoo kale waxa uu Maxkamadda ay khuseyso ka codsan karaa in safarka laga joojiyo cidda ay baaristu ku socoto.

## Qodobka 6aad:
## Warbixin Sannadeedka Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu ku baarayaa Xisaabaadka Dowladda muddo Labo (2) bilood gudahood ah oo ka bilaabata marka uu helo xisaab-xirka

sannadlaha ah ee Dowladda ugu dambeyn 30ka April si waafaqsan Sharciga Lr. 17 Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, waxa uuna natiijada ka soo baxda shaqada barista u gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya isaga oo nuqul ka siinaya Madaxweynaha JFS iyo Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha XFS.

2) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu raacinayaa iyadoo aanay ku koobnayn warbixin sannadeedka arrimaha soo socda:
   b) Aragtida baarista Xafiiska ee ku aaddan xisaabaadka Dowladda;
   t) Natiijooyinka muhiimka ah iyo talooyinka la xiriira ammaanada, joogtaynta shaqada, beekhaaminta dakhliga, ku filnaanta/kabidda iyo sida ay wax-kuool u tahay habka loo maamulay maaliyadda Dowladda.
   j) Wax kasta oo gaabis ah oo lagu ogaaday nidaamka ilaalinta iyo kontoroolka maaliyadeed oo gudaha ee ay leedahay hay'ad kasta ee isticmaasha dhaqaale dowladeed;
   x) Faahfaahin ku saabsan diiwaannada asaasiga ah ee aan la dhowrin ama xeerarka iyo hab-raacyada loo adeegsaday ee aan ku filnayn in lagu ilaaliyo ama lagula socdo hantida Dowladda; iyo
   kh) Ilaa iyo xadka ay tahay in ay adeegsatay hay'adda isticmaashay kharashka, talooyinka la socday warbixinnada iyo qaraaraadka ka yimid Guddiyada Maaliyadda Labada Gole ee BFS.
3) Warbixinnada Hantidhawrka waxaa ka mid noqon kara faallooyin ay bixiyaan hay'adaha Dowladda ee ay khuseyso. Hase yeeshee Xafiiska Hantidhawrka JFS ayaa leh in uu si buuxda oo tifaf-tiran u ilaaliyo warbixinnadiisa ku lifaaqan Xisaab- xirka Miisaaniyadda.

## Qodobka 7aad:
## Warbixinnada Baaritaannada Gaarka ah

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu go'aansan karaa ama Baarlamaanku ka codsan karaa in u sameeyo baaritaanno gaar ah oo uu ka diyaariyo warbixinno gaar ah.
2) Inta lagu gudo-jiro sannadka, Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu u gudbin karaa warbixinnada gaar ah Labada Gole ee BJFS, warbixinnadan waxaa suurta-gal ah in sidoo kale lagu daro warbixin sannadeedka Hantidhawrka.

## Qodobka 8aad:
## Helitaanka Xogta

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waa in uu si dhameystiran uga helaa cid ama hay'ad weliba uu weydiisto xogaha uu u baahan yahay, si uu uga guto waajibaadkiisa baariseed.
2) Madaxa hay'adda Dowladda, maaliyadda, mashaariicda iyo barnaamijyada Xukuumadda FS iyo Baarlamaanka JFS, waa in uu u xaqiijiyaa in Xafiiska Hantidhawrka JFS uu wakhtiga ugu habboon la kulmo dadka, ama helo dukumentiyada, kumbuyuutarada iyo nidaamyada kale ee xogta lagu keydiyo iyo sidoo kale hantida la xirirta gudashada iyo meel-marinta shaqooyinka, waajibaadka iyo awoodaha Xafiiska Hantidhawrka JFS leeyahay.
3) Madaxa hay'adda Dowladda, maaliyadda, mashaariicda iyo barnaamijyada Xukuumadda FS iyo Baarlamaanka JFS, waa in uu la wadaago Xafiiska Hantidhawrka JFS, wakhti kasta oo loo baahdo ama si joogto ah oo wakhtiyeysan dhaqdhaqaaqa xisaabaadka hay'adaha Dowladda, hadba sida uu u dalbado Xafiiska Hantidhawrku, si waafaqsan habka maamulka maaliyadda, sharciga maaliyadda iyo Sharcigan Hantidhawrkaba.
4) Hantidhawreyaasha gudaha ee hay'adaha Dowladda, maaliyadda, mashaariicda iyo barnaamijyada Xukuumadda FS iyo Baarlamaanka JFS, iyada oo la qaddarinayo xirfadda ay wadaagaan, waxaa ku waajib ah in ay siiyaan Xafiiska Hantidhawrka JFS nuqul ka mid ah warbixinnada ugu dambeeyey ee ka soo baxay Hantidhawrka gudaha.

## Qodobka 9aad:
## Talo-siinta Hay'adaha La Baaray iyo Daba-galka

1) Marka la dhammeeyo shaqada hantidhawrista, Xafiiska Hantidhawrka JFS waa in uu siiyo madaxa hay'adda Dowladda ee arrintu khuseyso warbixin qoran oo ay ku jiraan waxyaabaha ka soo baxay baarista, talooyin iyo waxyaabaha looga baahan yahay in lagu saxo, waana in madaxa Hay'adda Dowladdu ka siiyo arrintaas Xafiiska Hantidhawrka JFS jawaab-celin qoran muddo laba (2) asbuuc gudahood ah.
2) Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa uu siinayaa madaxa hay'adda Dowladda, maaliyadda, mashruuca iyo barnaamijyada wakhti go'an oo uu uga soo jawaabo natiijooyinka culus ee ka soo baxay shaqada Hantidhawrka, haddii jawaab ku habboon aan laga helin wakhtiga loo qabtay, waxaa arrinta loo gudbinayaa hay'adda dowladda ee ay khuseyso, si looga qaado tallaabada ku habboon.
3) Talooyinka uu bixinayo Xafiiska Hantidhawrka JFS waxa ay ku saleeysan yihiin caddeymaha ka soo baxay shaqada hantidhawrista ee la fuliyey.
4) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu dejinayaa nidaam iyo hab-raac daba-gal ku salaysan sharciga uu xafiisku leeyahay, si loo xaqiijiyo in hay'adaha la baaray si wanaagsan u raacaan tilmaamaha iyo talooyinka xisaabeed ee uu Xafiisku siiyey ama talooyin ay soo jeediyeen madaxda Dowladda Federaalka oo ay goleyaashu meel- mariyeen ama si gaar ah Baarlaamaanku ugu soo jeediyey Xafiiska Hantidhawraha Guud.

## Qodobka 10aad:
## Faafinta Warbixinnada

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS wuxuu warbixinnada u diyaarinayaa in ay noqdaan kuwo ay heli karaan dadweynuhu, si ay ula socdaan sida loo maamulo hantida iyo canshuurta dadweynaha waxaana lagu daabacayaa bogga mareegta (website) Xafiiska Hantidhawrka iyadoo ah qaab elektoroonig iyo Faafinta Rasmiga, hal bil kadib marka uu Warbixintiisa u gudbiyo Labada Aqal ee BJFS.
2) Dhammaan warbixinnada uu soo saaro Xafiiska Hantidhawrka JFS waxaa loo tixgelinayaa in ay yihiin dukumentiyo dowladeed oo daabacan, marka loo gudbinayo Hay'adaha Dowladda.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu warbixinnada sanadlaha ah si toos ah ugu gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, isaga oo nuqul ka siinaya Madaxweynaha JFS, Ra'iisal Wasaaraha iyo hay'adda la baadhey.
4) Marka ay helaan Guddoomiyeyaasha Labada Gole ee Baarlamaanka warbixinta waxay soo hordhigayaan fadhiga Goleyaasha muddo ku siman toban (10) cisho oo shaqo marka ay Goleyaashu furan yihiin, haddii Goleyaashu xiran yihiin saddex asbuuc oo shaqo gudahood marka ay furmaan.
5) Xafiisyada loo gudbiyay warbixinta ee ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan, waxay Xafiiska Hantidhowrka haddii loo baahdo waydiisan karaan warbixin dheeraad ah oo qoraal ama hadal ah, si looga gaaro arrinta uu soo gudbiyay hantidhawrku xal waafaqsan sharciga.
6) Waxaa kale oo uu Xafiiska Hantidhawrku u gudbinayaa natiijada baaristiisa Xafiiska Xeer-ilaalinta, haddii uu ka soo baxo tuhun ah in uu jiro fal-dembiyeed ka dhashay wax-is-daba-marin ama lunsi hanti ummaddu leedahay.

## Qodobka 11aad:
## Dib-u-eegista Warbixinnada Xafiiska Hantidhawrka

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa dib-u-eegis ku sameynaya, ka doodaya, kana baaraan degaya warbixinta Xafiiska Hantidhawka, isla markaana tallaabada ku habboon ka qaadaya muddo Sagaashan (90) Cisho oo xilli shaqo ah, kadib marka ay soo gaarto warbixintu.

## Qodobka 12aad:
## Bixinta Xogta

1) Isaga oo aan ka haysan oggolaansho qoraal ah ee Hantidhawraha Guud, qofna ma daabici karo, mana bixin karo xog la helay, iyada oo lagu gudo jiro baaris hantidhawris ee lagu sameeyey cid kasta marka laga reebo inta uu Sharcigu u oggolaanayo ama maxkamadi ku amarto.
2) Hantidhawraha Guud ee JFS oo eegaya xeer-nidaaminta xog-bixinta islamarkaana tixgelin gaar ah siinaya danta guud iyo waajibaadka xirfadeed ee ku saabsan sirta xogta la bixinayo, go'aan ka gaaraya waxyaabaha noqonaya xogta gaarka ah iyo qaabka ugu habboon ee loo bixin karo sida sharcigu jideeyey.

## Qodobka 13aad:
## Diiwaan-gelin

1) Xafiiska Hantidhawrku waxa uu diiwaan-gelinayaa dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada ay hay'adaha dowladdu la gelaan dowlad kale ama shirkado gaar loo leeyahay. Diiwaangalinta Hantidhowraha guud waxay ka dhigan tahay xaqiijinta in qandaraaskii uu helay Hanti-dhowraha guud si loo diiwaan galiyo. Hanti-dhowraha Guud wuxuu xaqiijinayaa oo keliya in qiimaha ku yaalla qandaraaska uu la jaan qaadayo ama uusan khilaafsanayn miisaaniyadda loo qoondeeyay Hay'adda iyo in saxiixa lagu saxiixay Qandaraaska uu yahay midka rasmiga ah sharci ahaan. Inta lagu jiro diiwaangelinta qandaraaska, Hantidhowraha Guud awood uma leh inuu dib-u-eegis ku sameeyo ama uu ansixiyo arrimaha kale ee qandaraaska, ama kuwa la xiriira tallaabooyinka iyo hababka uu soo maray amma u jeedooyinka dhaqaale ee qandaraaska loo bixiyey.
2) Xafiiska Hantidhawrka JFS wuxuu diiwaan-gelinayaa dhammaan Xeerarka iyo qaraarada ka soo baxa Baarlamaanka, Madaxda Dowladda sida Ra'iisul Wasaaraha ama Madaxweynaha JFS.

## Qodobka 14aad:
## Heshiisyada Hantidhawrayaal Ka Baxsan Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu heshiis la gali karaa haddii loo baahdo oo ah Qandaraas shaqo ee hantidhawrayaal madax-bannaan oo ka baxsan Xafiiska Hantidhawrka si ay u fuliyaan shaqo baaris oo baahi gaar ah loo qabo waxayna ka imaan karaan urur/hay'ad la timaadda awood iyo sumcad hantidhawris oo ay u dheer tahay khibrad iyo tixgelinno kale.
2) Urur/hay'ad kasta oo sameynaysa shaqo hantidhawr, iyaga oo ku shaqaynaya tilmaamaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxay shaqadooda u fulinayaan si waafaqsan halbeegyada Sharciga Xafiiska Hantidhawrka, sida ku xusan qodobka 5aad ee Sharcigan, heshiisyada Hantidhawrista caalamiga ah ee ay dowladda Soomaaliya qeybta ka tahay iyo heshiisyada urur goboleedyada Hantidhawrka ee waafaqsan sharciyada dalka.

# CUTUBKA AFARAAD:
# QAAB-DHISMEEDKA IYO MAGACAABISTA
## Qodobka 15aad:
## Qaab-dhismeedka Xafiiska Hantidhawrka

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS wuxuu yeelanayaa qaab-dhismeedka hoos ku xusan:

1) Hantidhawraha Guud;
2) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud;
3) La-taliyaha Sharciga ee Xafiiska Hantidhawrka Guud;
4) Agaasimayaasha Waaxyaha;
5) Xafiisyada Qeybaha iyo Unugyada;

6) Baareyaasha iyo hawl-wadeennada kale.

### Qodobka 16aad:
### Xarunta Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS

Xarunta Xafiiska madaxa-bannaan ee Hantidhawrka Guud ee JFS waa magaalo Madaxda dalka, wuxuuna xarumo ku yeelan karaa dhamaan dalka oo idil.

### Qodobka 17aad:
### Shuruudaha Hantidhowrka Guud

Shuruudaha soo socota ayaa lagu soo xulayaa Hantidhawraha Guud:

1) In uu yahay/tahay muwaadin Soomaaliyeed.
2) In uu Ieeyahay/Ieedahay hoggaamin iyo sumcad wanaagsan.
3) In uu dhimirkiisu/keedu dhan yahay.
4) In aysan da'diisu/deedu ka yareyn 40 sano.
5) In uu leeyahay/leedahay aqoon durugsan oo heer takhasus jaamacadeed, lana aqoonsanyahay oo la xiriirta Sharciga (law), Hantidhawrka, maamulka maaliyadda Dowladda, xisaabaadka ama dhaqaalaha;
6) In uu leeyahay/leedahay aqoon xirfadeed (Professional Certificates) oo la xirirta sharciga, Maamulka maaliyadda Dowladda iyo xisaabaadka Hantidhawrka.
7) In uu leeyahay/Ieedahay ugu yaraan toban (10) sano khibrad shaqo ah; iyo
8) In aan maxkamad ku xukumin wax dembi ah oo uu galay/gashay.

### Qodobka 18aad:
### Habraaca Magacaabista Hantidhawraha Guud ee JFS

3) Magacaabidda Hantidhowrka Guud waxaa soo jeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaana ansixinaya BJFS, isla markaana waxa Xeer Madaxweyne ku meelmarinaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4) Inta uusan billaabin shaqada Xafiiska, Hantidhawraha Guud waxaa la marinayaa "Dhaar" lagu maamuuso Madaxweynaha JFS hortiisa.

### Qodobka 19aad:
### Muddo-xileedka Hanti-dhowraha Guud ee JFS

1) Hantidhawraha Guud wuxuu shaqeynayaa muddo Shan (5) sanno ah, waxaana loo cusbooneysiin karaa shaqada hal mar oo keliya, iyadoo la raacayo hab-raaca ku xusan qodobkan, laakiin wuxuu hawlgab noqonayaa kadib marka uu gaaro sannadka hawlgabka sida ku cad Sharciyada Federaalka ee qeexaya hawlgabka, xaqsiinta, waxaa loo raacayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda ee JFS.
2) Inta uusan billaabin shaqada Xafiiska, Hantidhawraha Guud waxaa la marinayaa "Dhaar" lagu maamuuso Madaxweynaha JFS hortiisa.

### Qodobka 20aad:
### Madax-bannaanida Xafiiska Hantidhawrka JFS

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, marka u howshiisa gudanayo waa ka madax-bannaan yahay dhammaan laamaha dowladda, waana in uu u hoggaansamaa Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud inta uu ku guda jiro fulinta, meel-marinta shaqada & mas'uuliyadihiisa waa in uusan jirin amar ama kor-joogteyn uu ku leeyahay qof ama maamul kale.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu leeyahay xasaanad aan dacwad lagu oogi karin, inta uu ku guda jiro gudashada hawlaha caadiga ah ee Xafiiska, hadaysan jirin fal dambiyeed cad oo uu gacanta kula jiro.

4) Marka la magacaabo Hantidhawraha guud kadib ma qaban karo xil siyaasadeed, mana la yeelan karo xiriir shaqo oo toos ah iyo mid dadban toona xisbi siyaasadeed ama hay'ad gaar loo leeyahay ama mid Dowladeed, mana sameyn karo hawlo Hantidhawraha Guud ka faa'iidayo ama saameyn ku yeelanaya awoodaha ama xilka Xafiiska Hantidhawrka JFS, inta uu hayo xilka Hantidhawraha Guud.

5) Hantidhawraha Guud waa in uu ka fogeeyo naftiisa/nafteeda ballanqaad, waajibaad ama maalgashi kasta oo ku keenaya khilaaf dhab ah ama ka hor imanaya danta Xafiiska.

6) Xafiiska Hantidhawraha Guud waxa uu wada-shaqayn la yeelan karaa ama ka geyb-qaadan karaa hawlo hantidhowrista xirfadeed, ka qaban karaa jago ururo xisaabeed iyo hay'addo sameeya halbeegyada hantidhawrka, kuwaas oo hawlahoodu aysan ka hor-imaanayn doorka iyo hawlaha Xafiska Hantidhawrka JFS.

7) Xafiiska Hantidhawraha Guud waxa uu u xilsaari karaa qeybo ka mid ah shaqooyinkiisa saraakiil kale oo ka mid ah Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, laakiin u xil-saaristaasi kama qaadeyso mas'uuliyaddiisa Xafiiska iyo in lagula xisaabtamo Hantidhawraha Guud waxa ka dhasha ficillada ay sameeyaan dadka uu u xilsaaray qabashada shaqooyinkaas.

8) Xeerka anshaxa ayaa qabanaya Hantidhawraha Guud, ku-xigeennada, saraakiisha iyo dadka kale ee ka shaqeeya Xafiiska Hantidhawrka Guud ama matela Xafiiska.

9) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu u madax-bannaan yahay go'aan ka gaaridda Qaab-dhismeedka Xafiiska, iyadoo aan ka hor imaanayn Qodobka 15aad ee sharcigan.

10) Xafiiska Hantidhawrka ee JFS waxa uu fulinayaa mabaadi'da maamul wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka oo ku saleysan ka hortagga lunsiga hantida dowladda.

## Qodobka 21aad:
## Xil-waayidda Hantidhawraha Guud ee JFS

Hantidhawraha Guud waxa uu xilkiisa/keeda ku waayi karaa sababaha soo socda midkood:

1) In ay ku timaado geeri;
2) In uu xilka iska casilo, isagoo u gudbinaya Madaxweynaha JFS codsi qoraal ah oo uu ku caddeynayo in uu rabitaankiisa isaga casilayo xilka Hantidhawraha Guud;
3) In uu gaaro da'da hawl-gabka ee sharcigu tilmaamay, hasa yeeshee haddii ay jirto baahi in aan looga maarmin shaqada waxaa la waydiisan karaa in uu sii wado shaqada, iyadoo ay ku xiran-tahay in uu Hantidhawraha gaaray da'da hawl-gabka oggolaado in uu sii shaqeeyo;
4) In Maxkamadi ku hesho dembi, kaas oo uu ka dhasho xukun maxkamadeed intii uu doonaba ha la-ekaadee;
5) Caafimaad darro keeni karto in uu gudan waayo xilka iyo waajibaadka Xafiiska;
6) Waxaa Hantidhawraha Guud xilka Xafiiska looga qaadi karaa marka uu awoodi waayo in uu fuliyo shaqooyinka Xafiiska, sababo xil-gudasho la'aan, dayacaad xil, jabin ama xadgudub cad oo uu ku sameeyo fulinta xirfadeed iyo waajibaadka shaqo ama ku takrifal awoodaha sharci ee Xafiiska Hantidhawrka Guud.

## Qodobka 22aad:
## Xil-ka-qaadista Hantidhawraha Guud

1) Marka ay Madaxweynaha JFS soo gaarto cabasho ka dhan ah Hantidhawraha Guud ama sababta xilka looga qaadayo Hantidhawraha ay tahay mid ka mid ah arrimaha ku cad Qodobka 21(5) iyo (6) Madaxweynaha JFS ayaa magacaabaya guddi madaxbannaan ka kooban todobo (7) xubnood oo kala ah:
    b) Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda Golaha Shacabka
    t) Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda Aqalka Sare
    j) Labo (2) Garsoore oo ka mid ah Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee dalka, iyo
    x) Guddoomiyaha Bulshada Rayidka ee Soomaaliya.

kh) Guddoomiyaha Ururka Qareennada ee Heer Federaal

d) Guddoomiyaha Ururka Xisaabiyaasha Soomaaliyeed ee Heer Federaal

2) Xubnaha Guddigaas waxa ay daraasad, baaris iyo taxliilin ku sameynayaan arrimaha sababay cabashada ka dhanka ah Hantidhawraha Guud iyo in ay arrimahaasi yihiin kuwo sababi kara eedeyn, waxa ayna ugu badnaan muddo Afartan iyo Shan (45) cisho gudahood warbixintooda iyo talo-soo-jeedintooda u gudbinayaan Madaxweynaha JFS, si uu ugu go'aan qaato.

3) Sida ku cad faqradaha kala duwan Qodobka 21aad ee Sharcigan, mar kasta oo uu xilka laga qaado ama uu iscasilo Hantidhawraha Guud, waxaa lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee dowladda, iyadoo muddo Sagaashan (90) maalmood gudahood ah lagu soo magacaabayo Hantidhawre Guud oo cusub.

4) Waxaa sii-haye ahaan Xafiiska hawlihiisa u sii wadaya labada ku-xigeen ee Hantidhawraha Guud midka shaqada Hantidhawrka ku soo horeeyey, inta laga soo magacabaayo Hantidhawraha cusub.

## Qodobka 23aad:
## Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud

1) Labo ku xigeen ayaa loo magacaabayaa ku-xigeennada Hantidhawraha Guud.

2) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa laga dhex magacaabi karaa Saraakiisha sare ee Xafiiska Hantidhawraha Guud, waxaa kale oo laga keeni karaa bannaanka, waana in uu yahay qof buuxiyey shuruudaha ku xusan qodobka 17aad ee sharcigan.

3) Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud marka laga keenayo Saraakiisha Xafiiska waxaa la magacaabayaa iyada oo la tixgelinayo hab-raaca dallacaada Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud.

4) Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud marka uu bannaanka ka imaanayo wuxuu shaqada Xafiiska Hantidhawrka Guud ku soo gelayaa tartan furan iyo hab-raac waafaqasan sharcigan.

5) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa soo jeedinaya magacaabistooda Hantidhawraha Guud ee JFS, waxaana Xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha JFS.

6) Labada Ku-xigeen kii uu u magacaabo Hantidhawraha Guud ee JFS ku-sime ayaa:

b) Sii-wadaya xilka Hantidhawraha Guud, waqtiga uu ku maqan yahay Hantidhawraha Guud fasax, hawlo shaqo ama xanuun.

t) Ku-simaha ama sii-hayaha wuxuu u qabanayaa shaqooyinka Xafiiska sida Hantidhawraha guud u maamulayey.

j) Ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud, marka uu yahay ku-sime ama sii-haye xilka Hantidhawraha Guud wuxuu leeyahay mid la mid ah awoodaha, xasaanadda iyo madax- bannaanida uu leeyahay Hantidhawraha Guud.

## Qodobka 24aad:
## Xil-ka-qaadista Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud

1) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa xilka Xafiiska looga qaadi karaa si waafaqsan habka lagu magacaabay, sida ku cad Qodobka 23aad ee Sharcigan, iyadoo loo marayo si waafaqsan hab-raacyada xilka qaadista ama shaqo ka joojinta ee lagu caddeeyey siyaasadaha la ansixiyey ee maamulka shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.

2) Ku-xigeennada Hantidhawraha Guud waxaa xilka Xafiiska looga qaadi karaa sababo la xiriira in uu awoodi waayo gudashada ama fulinta waajibaadka iyo shaqooyinka xafiiskiisa/keeda, taasoo ka dhalatay xaalad caafimaad, ama jabin cad oo uu ku sameeyo/sameyso fulinta xirfadeed ee shaqada Xafiiska.

3) Xil ka qaadista Ku-xigeenka Hantidhawraha Guud waxaa soo jeedinaya Hantidhawraha Guud ee JFS, waxaana xeer ku soo saaraya Madaxweynaha JFS.

## Qodobka 25aad:
## Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waa Hay'ad Dowladeed oo madax-bannaan sida ku xusan Dastuurka JFS, waxa uuna yeelanayaa shaqaale hadba intii lagama maarmaan u ah fulinta iyo habsami-u-socodka shaqooyinka Xafiiska ee Sharcigan lagu xusay.
2) Shaqaalaha Xafiisku waxa ay ku imaanayaan tartan furan oo ku salaysan aqoon iyo khibrad la xiriirta shaqada Xafiiska, si waafaqsan sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Siyaasadda Maamulka Shaqaalaha ee Xafiiska Hantidhawrka.
3) Dhammaan xulashada/qaadashada shaqaalaha iyo hawl-wadeennada Xafiiska waa in lagu xaqiijiyo hab-raac hufnaan leh oo ku saleysan khibrad, waayo aragtinnimo iyo halbeeg xirfadeed, waxaana loo marayaa hab-raaca ku xusan Siyaasadaha iyo Xeer-hoosaadka Xafiiska Hantidhawrka Guud.
4) Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu dejinayaa siyaasado iyo xeer-hoosaad la ansixiyey oo uu ku shaqeynayo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, kuwaas oo caddeynaya dhammaan xaaladaha, shuruudaha, dallacaadda, asluubta shaqada iyo arrimaha kale ee maamulka shaqaalaha Xafiiska si waafaqsan Sharcigan iyo Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.
5) Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxaa laga wada diiwaangelinayaa Guddiga Qaranka ee Shaqaalaha Rayidka Dowladda Federaalka Soomaaliya.
6) Qaadashada Shaqaalaha waxaa loo marayaa si lamid ah xafiisyada madaxa-bannaan, waafaqsanna Sharciga Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.
7) Dallacaadaha, xaqsiinta oo ay ku jiraan (mushaarka & gunnooyinka) iyo dhiiragelinta shaqaalaha waxaa loo marayaa hab-raac mudnaan siinaya dabeecadda shaqada oo ka duwan shaqooyinka kale ee Dowladda, si loo ilaaliyo Shakhsiyadda, madax-banaanida Xafiiska iyo xuquuqaha ka dhalanaya duruufaha ay ku shaqeynayaan shaqaalaha.
8) Xuquuqda iyo shuruudaha oo uu mushaarku ka mid yahay waxaa xaddidaya sharciga iyo xeerarka shaqaalaha Rayidka, iyadoo taasi aysan ka hor imaanayn in Xafiisku sameyn karo dhiirrigelin iyo gunnooyinka ku dhisan dabeecadda shaqada dheeraadka ah ama lagama maarmaanka u ah waajibaadka Xafiiska, isla markaana miisaaniyadda Xafiisku oggolaaneyso, taasoo lagu qeexayo hab-raac waafaqsan sharciga.
9) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu yeelanayaa labo Guddi oo kala ah: Guddiga Dallacaadda, Abaal-marinta, iyo Anshax-marinta iyo Guddiga Goob Shaqo, kuwaas oo ku imaanaya, una hawlgalaya si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

## CUTUBKA SHANAAD:
## MIISAANIYADDA IYO ISLA-XISAABTANKA
## Qodobka 26aad:
## Miisaaniyadda

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu leeyahay miisaaniyad u gaar ah oo dabooli karta gudashada waajibaadkiisa sharci si wax-ku-ool ah, iyadoo uu diyaarinayo una gudbinayo Wasiirka Maaliyadda si uu ugu soo daro Buugga Qoondada Miisaaniyadda Dawladda.

## Qodobka 27aad:
## Deeqaha

1) Ka sokoow Miisaaniyadda Dowladdu u qoondaysay, Xafsiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu deeq ka heli karaa Hay'adaha deeqaha bixiya, taasoo ah kaalmo lagu tayeynayo adeegga Xafsiisku u hayo Dowladda, waxaana ka mid noqon kara tababarro waqti gaaban ama waqti dheer ah oo aqoon kororsi ah ama agabka fududeeya shaqada.

2) Heshiis kasta oo galo Xafiiska Hanti-dhawrka ee uu ku helayo deeq, taas oo ay ku jiraan deeqaha aan lacagta ahayn oo ka timid deeq bixiye ama shakhsiyaad gaar ah, waxaana la waafajinayaa hab-raaca maamulka maaliyadda dalka iyo qorshaha maaliyadda Dowladda.

### Qodobka 28aad:
### Warbixinta Waxqabadka Sanadlaha ah ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS

1) Hantidhawraha Guud waxa uu sannad walba u gudbinayaa Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha xukuumadda FS warbixin sannadeed iyo qoraallada maaliyadeed ee Hantidhawrka sannadlaha ah ee uu sameeyo Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.
2) Warbixinta waa in ay ku jirto warbixin ku saabsan ilaa iyo inta uu Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS ku guuleystay qorshe sannadeedkiisa, xisaab-xirka iyo qoraaladda maaliyadeed ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS.
3) Warbixin sannadeedka wax-qabadka ee ka soo baxda ama uu soo saaro Xafsiiska Hantidhawrku waxaa lagu daabacayaa barta Mareegta (internet) Xafiiska Hantidhawrka si ciddii danaynaysa uga hesho, waxaana sida ku cad qodobka 5aad (21) ka reeban in la daabaco xogaha gaarka ah oo aysan habboonayn in ay cid kasta ogaato.

## CUTUBKA LIXAAD:
## ISKAASHI HEER QARAN AMA CAALAMI AH
### Qodobka 29aad:
### Iskaashi Heer Qaran ah

1) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu sameynayaa xiriiro xirfadeed oo shaqo oo uu la leeyahay dhammaan Xafiisyada Hantidhawrka Guud ee Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu xaqiijinayaa in sannad walba baaris xisaabeed lagu sameeyo lacagaha ay Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya siiso dhammaan Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
3) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu sidoo kale xaqiijinayaa in sannad walba baaris Hantidhawr lagu sameeyo dhammaan deeqaha, tabarrucaadka iyo deymaha caalamiga ah ee la siiyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, kuwaas oo heshiiskooda ay gashay Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu soo saarayaa warbixino dhammeystiran ee la xariirta hawlaha Hantidhawrka, waxa uuna u dirayaa Dowlad-goboleedka la baaray, Labada Gole ee Baarlamaanka JFS, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuummadda FS.

### Qodobka 30aad:
### Iskaashiga Heer Caalami ah

Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu iskaashi la sameysan karaa hay'adaha hantidhawrista ee Dowladaha kale leeyihiin ama ururo hantidhawr oo caalami ah, si loo sameeyo shaqooyin Hantidhawr oo Heer Qaran ama Heer Caalami ah iyo kuwo isku jir ah, waxa uuna Xafiisku xubin ka noqon karaa hay'adaha caalamiga ah ee Hantidhawrka Sare (The International Organization of Supreme Audit Institutions (INTOSAI), si waafaqsan shuruucda Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

### Qodobka 31aad:
### Qiimeynta Hantidhowrka

Si loo ilaaliyo sharciga, looga hortago ku tagri falka awoodaha, loona hubiyo in si sharciga waafaqsan loo fuliyay shaqadii Hantidhawrka, labadii sanaba halmar, waxaaGuddiga Maaliyadda ee Baarlamaanku u dirayaan si tartan furan ah, Hantidhowre madax banaan, taas oo eegaysa in

Xafiiska Hantidhawrka shaqadiisa u qabtay labadii sano ee lasoo dhaafay si wafaaqsan shuruucda dalka, halbeegyada xirfadeed iyo nidaamka caalamiga ah ee hantidhiwridda xisaabaha dowladda.

## CUTUBKA TODDOBAAD:
## DEMBIYADA IYO CIQAABAHA
### Qodobka 32aad:
### Dembiyada

1) Qofku wuxuu dembi galayaa marka:
   - b) Isaga oo aan heysan caddeyn sharci ah ama cudur-daar la'aan uu si ula kac ah uga hor-istaago baareyaasha Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS in ay gutaan waajibaadkooda shaqo ee ku cad Sharcigan.
   - t) Isaga oo aan heysan cudur-daar macquul ah uu diido ama uu ku guul-darreysto in uu u hoggaansamo amar ama tilmaan kasta oo laga bixiyey Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS oo la xiriirta baaris socota.
   - j) Isaga oo aan heysan caddeyn sharci ah ama cudur-daar la'aan uu diido ama ku guul-dareysto in uu siiyo baare ka socda Xafiiska Hantidhawrka JFS in uu helo buugaagta hanti kasta, diiwaannada, baaqiga lacageed ama qoraaladda kale, xogta elektorooniga ah ama kuwa kale ee lagu caddeeyey Sharcigan.
   - x) Isaga oo og uu siiyo baare ka socda Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS qoraallo been ah ama la been-abuuray, taasoo uu uga dan leeyahay in uu wax-qariyo ama ku marin habaabiyo Xafiiska Hantidhawrka.
2) Sidoo kale xubin kasta oo ka mid ah Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu galayaa dembi haddii uu;
   - b) Ka dalbado ama ka qaato wax laaluush ah, tixgelin uu ku raadsanayo beddelasho ama wax abaalmarin ah si uu uga gaabiyo ama uusan u gudan waajibaadkiisa.
   - t) Isaga oo og uu ku guul-dareysto in uu warbixin ka siiyo Hantidhawraha Guud wax kasta oo xad-gudub ama nidaam darro ah ee uu la kulmay intii uu ku gudo jiray gudashada hawlihiisa hantidhawrennimo.
   - j) U sameeyo Hantidhawraha Guud warbixin kasta oo uu og yahay in ay been tahay ama aysan jirin sabab lagu aamini karo in ay run tahay, sida in la diiwaan-geliyo ama kharash bixin (warrant) qaldan.
   - x) Si xun ama khaldan u isticmaalo xogta uu ogaaday marka uu fulinayo baarista hantidhawr ee xisaab kasta oo lagu xusay sharcigan.
   - kh) Ku qalqaaliyo madaxa hay'adda dowladda, hantidhawraha gudaha ama sarkaalka dowladda in uu gaysto ama ka tago wax ficil ah oo ka mid ah mas'uuliyadiisa shaqo, inta ay ku guda jiraan gudashada waajibaadkooda shaqo ee lagu xusay sharcigan.
   - d) Marka ka tagista ama geysashada ficilkaas ay sababayso lunsashada lacag Dowladeed, jebinta shuruuc maamul iyo dayacaadda danta Dowladda Federaalka
   - r) Marka cid kasta oo ka tirsan Xafiiska Hantdhawraha Guud ee JFS ay si ula kac ah ugu tagrifasho awoodaha ku xusan Sharcigan (Abuse of Power).

### Qodobka 33aad:
### Ciqaabaha

1) Qof kasta oo lagu eedeeyo mid ka mid ah ama ka badan dembiyada ku xusan Qodobka 32aad ee Sharcigan laguna helo, waxa uu muteysanayaa in lagu xukumo ganaax ama xabsi ama labadooda oo wadajira, si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
2) Haddii qofka lagu riday xukun kama-dambeys ah, laguna helay dembi ah sharci jabin la xiriirta khiyaanada, gaabiska ama si-xun u adeegsiga la xiriirta maamulka lacagta Dowladda, Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu arrinta u wareejinayaa Xafiiska

Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka iyo hay'adaha kale ee fulinta sharciga, si ay uga qaadaan qaddarka lacagta ee lagu lunsaday khiyaanada, gaabiska iyo si-xun u adeegsiga, iyada oo ah hanti ay leedahay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## CUTUBKA SIDEEDAAD:
## KEYDIN, DHAQAN-GAL IYO ARRIMO KALE

### Qodobka 34aad:
### Kaydinta Warbixinta

Warbixinnada iyo natiijooyinka ka soo baxa baarista uu sameeyo Xafiiska Hantidhawrku waxaa lagu keydinayaa Qeybta Xog-dhowrka (archive) ee Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS, waxaana loo kala saarayaa xogaha mid gaar ah oo aysan habooneyn in ay gaarto Dadweynaha iyo Xog loogu tala galay Dadweynaha.

### Qodobka 35aad:
### Hantida Xafiiska

Dhammaan alaabta iyo hantida taala Xafiiska Hantidhawrka Guud waxaa ay ka mid tahay Hantida Dowladda, waxaana lagu maamulayaa xeerarka lagu dhaqo hantida Dowladda Federaalka.

### Qodobka 36aad:
### Xeer-nidaamiye

1) Hantidhawraha Guud ee JFS waxa uu sameynayaa Xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan galinayo Sharcigan iyo hannaanka maamulka iyo hawl fulinta Xafiiska, kuwaas oo ay ka mid yihiin;
    - b) Anshaxa iyo abaal-marinta shaqaalaha.
    - t) Keydinta Dukumentiyada iyo xifdinta sirta xafiiska.
    - j) Nidaamka Anshaxa Xafiiska Hantidhawrka JFS (Code of conduct).
    - x) Habraaca gelidda heshiisyada la xiriira hawlaha Xafiiska.
2) Xafiiska Hantidhawrka Guud ee JFS waxa uu soo saari karaa buugaag, tilmaamo iyo hab-raacyo, hadba marka loo baahdo, kuwaas oo si gaar ah oo faahfaahsan u caddeynaya mas'uuliyadda iyo shaqooyinka la xiriira fulinta Sharcigan iyo Xeernidaamiyeyaashiisa.
3) Wasiirka Maaliyadda ayaa u gudbinaya Xeer-nidaamiyaasha uu soo saaray Hantidhowrka Guud Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan, iyadoo la ogeysinayaa Guddiyada Maaliyadda ee Labada Aqal Baarlamaanka JFS. Xeer-nidaamiyaasha la ansixiyay waa in lagu daabacaa Faafinta Rasmiga ah.
4) Xeer-nidaamiyeyaasha lagu soo saaro Qodobkan Farqadiisa 1aad, waa in ay waafaqsanaadaan Sharcigan.

### Qodobka 37aad:
### Baabi'in

Sharicgan waxa uu baabi'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo ku saabsan hawlaha hantidhawrka dalka, waxa uuna beddelayaa shuruucdii hore ee Hantidhawrka, gaar ahaan Sharciga lambarkiisu yahay 34 ee soo baxay 14/04/1972.

### Qodobka 38aad:
### Dhaqan-gal

Sharcigaani wuxuu dhaqan-gelayaa markii ay ansixiyaan Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.